CornerHouse

waanu maqalnaa.

XANAANE BIXIYEHU WUXUU QABI KARAA SU'AALO KU SAABSAN MAWDUUCYADAN SOO SOCDA; MAADAAMA AY TAASI JIRI KARTO, WAXAA LAGA YAABAA IN AKHBAAR DHEERAAD AHI AY CAAWINI KARTO ARINTAAS:

Ka waran Baaritaanka caafimaadka? Baaritaan caafimaad oo dhaqtar ilmahood uu qaadayo ayaa waxaa laga yaabaa in ha dhow looga qaado CornerHouse. CornerHouse waxay ku dadaashaa in ay sugto in baaritaanada caafimaadku aysan dhalin welwel dheeraad ah; xaqiiqii mar mar badan baaritaanadu waxayba yareeyn karaan walaacyada ku saabsan arimaha caafimaadka la xiriira.

Maxaa lagu sameeyaa akhbaarta caafirmaadka iyo wareysiga? CornerHouse waxa ay xafidaa xogta qofka wax loo qabtay. Waraysiga iyo baaritaanka caafimaadku waxay qayb ka yihiin baaritaanka guud wixii akbaar ahna waxaa ilaaliya oo xafida sharciyada ka degsan ilaalinta xogaha.

Sidee ayey xanaano bixiyeyaashu wax u caawin karaan? Shakhsiyaadu waxay shacuurtooda ku muujiyaan siyaabo kale duwan oo ay ka mid yihiin hadal iyo dhaqan. Xanaano bixiyeyaashu waxa laga yaabaa in ay bixiyaan gargaar siyaado ah xiliga waqtigan lagu jiro. Hadii qof ka hadlo wixi dhacay, sida ugu roon oo la sameyn karaa waa in la dhageyso qofkaas ka dibna loo siiyo talo iyo caqli celin quman (sida. Waad ku mahadsan tahay sheegida aad sheegtay wixii dhacay; Aad baan kuugu hanwaynahay shaagida awgeed; khaladka adigu ma lahid). Su'aalo ha ka waydiin wixii dhacay.

Sidee ayey qoysasku ugu dul qaadaan karaan? Wax kasta oo uu maxsuulku noqdo, nidaamnka baaritaanku wuxuu noqon karaa mid walwal ku dhaliya qoysaska. Waa muhiim in cid kastaa ay hesho gargaarka ay u baahan yahay. Kolka qoysasku ay yimaadaan CornerHouse, waxaa laga yaabaa in ay helaan fursad ay si siyaado ah ugula hadli karaan Xiriiriyaha Gargaarka Qoyska wixii caawimaad ah ee la heli karo.

XANAAN BIXIYE KASTAA WUXUU U BAAHAN YAHAY IN UU OGAADO:

Waa maxay CornerHouse?

- CornerHouse waa hay'ad samefal ah oo madax banaan oo la shaqeysa hay'adaha sharci ilaalinta, kuwa ilaalinta ilmaha, iyo kuwo kale oo xirfadleyaal ah.
- CornerHouse waa meel amaan ah oo soo dhaweysa dhageysatana ilmaha, kurayda, iyo dadka waaweyn ee dagan ee la fara xumeeyey ama dagaal gacan qaadid ah arkay oo u soo taagaanaa.

Sidee ayey xanaane bixiyeyaashu ugu diyaarin karaan shakhsiyaadka wareysiga?

- Xanaane bixiyeyaashu waxay u sheegi karaan dadka in CornerHouse ay tahay meel amaan ah oo looga hadli karo wixii dhacay. la socod sii in ilmo, kurayo, iyo dadka waaweyn ee dagani ay tagaan CornerHouse, aysana dhib laheyn in loo waramo dadka halkaa jooga.
- Xanaane bixiyeeshu waa in aysan waraysan cidna ka hor inta aysan iman CornerHouse; tani waxa ay caawinaysaa in la hubsado in aysan ku daalin ka jawaabida su'aalaha wareysiga ka hor.
- Ilamaha yar yar waxay soo qaadan karaan shayaal ay dugsadaan (sida buste) laakiin ma aha in ay soo qaataan shayaasha lagu ciyaaro (sida sanabyada ama kuwa lagu ciyaaro ee fiidyowga ah). In kastoo ilmahu uu shayadaas haysan karo inta uu joogo meesha hore ee soo dhoweynta inta la sugayo balanta, looma ogolaan doono ilmahu in uu qolka wareysiga la soo galo shay'aasha caynkaas ah.

Maxaa dhaca marka qoysasku yimaadaan CornerHouse?

- Wareystayaasha CornerHouse waxay wareysataan xanaane bixiyeyaasha si wax uga ogaadaan qof la la wareysano, ayna ugu sharxaan waxa dhici doona xiliga wareysiga.
- Wareysiga wuxuu ka dhacaa qof gaar ah; wareysiyada waxaa laga duubaa cajalad fiidyowga ah qaar ka mid ah dadka hawsha wadaana waxay ka daawadaan wareysiga qof kale. Xanaane bixiyeyaasha looma ogola in ay daawadaan fiidyowgaas maadaama ay qayb ka yihiin baaritaanka. Wareystaha tababarani wuxuu noqon karaa rag iyo dumar.
- Xiliga wareysigu socdo, xanaaneeyuhu wuxuu heli karaa fursad uu kula kulmo Xiriiriyaha Gargaar Qoyska ee CornerHouse xiriiriyehaas oo bixiya caawimaad iyo khayraado kale.
- Wareysiga CornerHouse ka dib, hay'adaha sharci ilaalinta iyo/ama baareyaasha hay'adaha ilaalinta ilmahu inta guud waxay si kooban ula kulmaan xanaane bixiyeha. Waxaa laga yaabaa in ay markaa u sharxaan intii ay awoodaan baaritaanka xanaane bixiyeha ayna ka jawaabaan wixii su'aal ah ee ku saabsan wixii xiga ee dhici doona kolkaa ka dib.
- Qoysasku waa in ay ku tala galaan in balanta wareysiga ee CornerHouse ay qaadato 2 saacadood caadiyan wareysigu wuxuu bilaabaa 10 - 20 daqiiqo ka dib marka dadku yimaado CornerHouse.

Ka waran hadii qoysasku qabaan su'aalo ku saabsan balanta?

- Qoysasku waxay wici karaan baaraha balanta qabtay. Si loo ilaaliyo xogta iyo amaanka macmilkayga, CornerHouse telefoonka cidna uguma sheegto akhbaar ku saabsan balamaha.

Si loo xafido dhamaan xogta dadka yimaada CornerHouse, isticmaalka dhamaan qalabka gacanta lagu qaato ee korontada ku shaqeeya si xoogan ayaa loo waanteeyey. Dhamaan qalabka caynkaas ah waa in la dameyaa ka hor inta aan la soo gelin qolka wareysiga.



2502 10th Avenue South
Minneapolis, MN 55404
612.813.8300

www.cornerhousemn.org

©2014 CornerHouse. All Rights Reserved.